

WE WANT YOU BACK

Inviting un-enrolled young people to “Come Home to Minneapolis” and choose a path to graduation

Xaashida Xaqiiqada (Fact Sheet)

Maxay (What)

- Barnaamijka “We Want You Back” ayaa xoog saaraya kuna wajahan fiiro gaar ee dadweynaha ee dhibaatooyinka ka tegidda dugsiga iyo bugcadda guul gaadhka Miniyaabolis, isla markaasna isku biirinaya xeelado wax ku ool ah iyo ilo bulsheed ee lagu xallinayo.
- Dugsiyada Dadweynaha Miniyaabolis ayaa darraasad ku sameeyey “We Want You Back” 2009 iyadoo bar tilmaameedku ahaa tilmaamidda kuwii ugu dambeeyey ee dugsiga isaga taga, isla markaasna samaynaya wax allaale iyo wixii loo baahan yahay si dib loogu soo celiyo.
- Iyadoo ay nagu taageerayaan Golaha Xiriirinta dhallinyarada (YCB), waxaan abuuraynaa ololayn caam ahaaneed ee magaalada oo idil ah, waxaan isku soo ururinaynaa mutadawiciin, isla markaasna doonaynaa in dhallinyaradeennu ogaato: WE WANT YOU BACK!

Yoolashaasi oo ku began irrid/albaab garaacid magaalada oo dhanGoals leading up to Setember 11, 2010,

- **1,000 naftood hureyaal dugsiyada iyo bulshada** ayaa la tababaray, la isku soo ururiyeyna si ay ula xiriiraan dhallinyarada albaab garaacid, wicid iyo u dirid dhambaal elegtaroonig ah (door knocking, phone or text message).
- **2,000 dhallinyaro ah** ayaa lagula xiriirayaa farriimo: WE WANT YOU BACK.
- **200 arday** oo dub isugu diiwaan geliya dugsiga, kuna rida tubta ay ku qalin jabin lahaayeen.

Sababteed (Why)

- sababo kala duwan awgood, arday fara badan ayaa ka taga dugsiga inta ayan qalin jabin. Arrimaha qaarkood, Dugsiyada Dadweynaha Miniyaabolis ma awoodaan inay ogaadaan inay dib isugu qoreen dugsi degmo kaleFor a variety of reasons, many students leave school before graduating.
- Ardaydaasi qaar ka mid ah ayaa aad ugu dhow inay kasbadaan Shahaadadooda, iyadoo ay ka dhimman yihiin dhawr dhibcood, dhibcaha qalin jabinta mid ka mid ah imtixaannada gobolka (lacking only a few credits or a passing grade on one of the state’s tests).
- Kuwo kale waa da’da dugsiga dhexe, xataana aan gaarin da’dii lagu oran lahaa dugsi ka bax, sharciyan waxaa looga baahan yahay inay dugsiga dhigtaan.
- La xiriiridda ardayda aan diiwaan gashanayn iyo ku dhiirrigalinta inay dugsiga ku soo laabtaan waa shaqo Dugsiyada Dadweynaha Miniyaabolis keligood qaban karin. Golaha Xiriirka Dhallinyarada (YCB) iyo xiriiradeeda bulshada iyo xiriirka bulshada ayaa muhiim u ah isku uruurinta dadaalka iyo waxqabadka magaalada oo idil, si u gaaraan dhallinyarada, isla markaasna ay aaddiyaan hanaankii ay ku qalin jabin lahaayeen.

Sidee

Ardayda iyo baahidooda ayaa kala duwan:

(How)

- **Ardayda dugsiga dhexe una dhexeeya da’da 12-15; abbaarta loo doorbidayo ayaa ah inay u laabtaan dugsigoodii dhexe ee caadiga ahaa.**
- **Ardayda dugsiga sare, da’da 16-18; laga yaabo inay dhawr dhibcood ka dhimman yihiin, ama ay u baahan yihiin inay ku gudbiyaan imtixaanka gobolka; dugsiga sare ee caadiga ah ayaa laga yaabaa inuusan ahayn meesha ku habboon. Siyaabaha ka habboon ayaa laga yaabaa inay tahay waxbarasho khadka internet-ka ah (online learning) ama dugsi kale ee lagu beddesho. Dhawr kala doorasho ayaa diyaar u ah ardaydaasi.**
- **Ardayda u kala gooshaya da’da 18-21, caqabadaha luqadda ka haysata iyo xaaladaha noloshu isku cakiran ayaa u baahan karta dhawr wadiiqo ee tacliimeed iyo baahiyo kaleba.**



MINNEAPOLIS
PUBLIC SCHOOLS
Urban Education. Global Citizens.



We Want You Back ma aha dhacdo hal mar keliya.

Waa wadaag u dhexeeya dugsiyada iyo bulsho weynta iyo ballan qaad in dhallinyaradeenna inaan ku taageerayno wadadii ay ku qalin jabin lahaayeen.

Kuma (Who)

- Dugsiyada Dadweynaha Miniyaaboliis ayey ka go'an tahay aragtida "Cunug Walba Kulliyad U Diyaarsan Yahay", arday *kasta* oo gacan loo fidiyo iyo in la sameeyo wax kasta oo ay nagu qaadan karto inaan ku caawinno inay ka qalin jabiyaan dugsiyada sare, shahaadadoodana qaataan waa xil na saran. Xaruunta Dhexe ee Waxbarashada iyo dugsiyada la doorbido (Area Learning Centers and alternative schools) ayaa shaqadan muhiim u ah iyo xiriir bulsho joogto ah ee kaaba horumarka ardayda.
- Golaha xiriirka Dhallinyarada (Youth Coordinating Board) ayaa isagu ku habboon inuu uruuriyo naftood hureyaasha bulshada si loogu lifaaqo dadaalka dugsiyada, Magaalada Miniyaaboliis, Degmada Hennepin, Golaha Hawaayadaha Miniyaaboliis (Minneapolis Park Board), Maktabadaha Degmada Hennepin iyo hay'adaha ballaaran ee u adeega dhallinyarada, hay'adaha aan faa'iido doonka ahayn, macbudyada iyo hay'adaha shaqada iyo bulshada.
- Shir Guddoomiyeyaasha Ololaha We Want You Back Campaign waa Kormeere Guud Superintendent Bernadeia Johnson, duga Magaalada Miniyaaboliis, R.T. Rybak Qareenka Degmada Hennepin Mike Freeman.
- Ololaha ayaa waxaa qaban qaabinaya hay'ado, dadweyno, kuwa gaar iyo hay'ado aan faa'iido doonka ahayn.

Albaab Garaacid Guud(City wide Door Knock Setember. 11)

- Kooxo naftood hureyaal tabaabaran ayaa magaalada ku faafaya, si ay u gudbiyaan dhambaal bayaan ah: WE WANT YOU BACK!
- Kooxaha ayaa helaya tilmaamihii ay ula xiriiri lahaayeen kooxaha dhallinyarada ah ee la doonayo (tusaale, ku xiran baahid luqadda, da'da iwm).
- We Want You Back Central, ayaa ah goob ilo adeega, isla markaasna wixii la rabo la keeni karo iyo wicitaannada ardayda xiisaynaya inay iskuulka dib isugu qoraan ISLA GOOBTA (ON THE SPOT).
- Shaqaalaha MPS ee We Want You Back Central ayaa ka jawaabaya su'aalaha ardayda:
 - Immisa dhibcood ayaan u baahnahay si aan u qalin jabiyo?
 - Dugsigee barnaamijyadiisu I anfacayaan?
 - Maxay yihiin shuruudaha kale ee loo baahan yahay si aan iskuulka ugu noqdo maanta ?
 - Shaqadee kale ama taageeradee bulsheed diyaar ii ah inay iga caawiyaan sidii aan u qalin jabin lahaa?

Wacyi galinta We Want You Back ayaa soconaya hadda ilaa Setember, iyadoo naftood hureyaal bulsheed iyo fursado gaarsiin ay bil bil diyaar u yihiina.

Haddii aad doonayso inaad wax badan ka ogaato Ololaha We Want You Back ama aad doonayso inaad mutadawac noqoto: Jo Haberman, Golaha Xiriirka Dhallinyarada (Youth Coordinating Board), 612-673-2720 or wwyb@ycb.org.

Haddii aad doonayso inaad barnaamijyada iyo ikhyaarrada wax ka ogaato: Mary Barrie, Minneapolis Public Schools 612-668-0721 ama mary.barrie@mpls.k12.mn.us.